

**UJEEEDO: CADEEYN KU DARSASHO SAAMI**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **29/04/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

**CADEEYN BIXIYAHA 1AAD:- MOHAMED MOALLIM ABUKAR MOHAMED**, Hooyo: Madiino Sheekh Maxamed Yarow, Somali ah, Ku Dhashay: Buuloburte, Sanadkii: 18/01/1967, Sita: Somali Passport, Lr. P00794146, Kana soo baxay waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaliya.

**CADEEYN BIXIYAHA 2AAD:- IBRAHIM ABDI IBRAHIM**, Hooyo: Halimo Hassano Mahad, Somali ah, Ku Dhashay: Isiolo, Sanadkii: 06/06/1990, Sita: Kenyan passport, Lr. AK0077172

**B-** Anaga oo kala ah **1- MOHAMED MOALLIM ABUKAR MOHAMED, ahna milkiilaha Shirkadda 2- IBRAHIM ABDI IBRAHIM**, ahna Gudoomiyaha Shirkadda **Asal Pharma**, sida ku cad Xeerka Shirkadda **Rep No.550049, Tr.08/05/2017**, kana soo baxay Xafiiska Nootaayaha Xamar, uuna ku saxiixanyahay **Dr.Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamuud**, Waxaan qoraalkaan si wadajir ah ku Cadaynaynaa Anaga oo Maskaxda iyo Caqligaba Ka fiyow Cid Naqasabtayna aysan Jirin in **ABDULHAKIM LUKMAN HAJI MOHAMED, Ina Caasho Macallin Cabdi, ku dhahsay Muqdisho** inoo dhiibtay lacag dhan \$ **50,000 (Konton kun oo dollarka Mareekanka ah)** in aan ugu darno Shirkadda **Asal Pharma Co.(APHCO)** kuna shubay Akoonka Shirkadda **30074436**, taariikhdu marka ay eheed **7/01/2025**.

**DULUUCDA HESHIISKA**

- \* Shirkaddu waxay ka qaadeysaa saamilaha 30% kororka uu soo saaro saamigiisa kaa soo xisaab xirkiisu yahay sanadle.
- \* Saamilaha waxaa u furan in uu kordhin karo saamigiisa sidoo kalana uu kayareyn karo inta uu hada yahay iyadoo marwalbaa uu isbadal dhaco dib loo cusbooneysiin doono heshiiskan.
- \* Saamilaha hadii uu doono in uu dib ula baxo saamigiisa, waxaa laga doonayaa inuu sii wargeliyo maamulka shirkadda 4 bilood ka hor waqti xisaabeedka.
- \* Waqti xisaabeedka shirkadda waa 31 May sanad waliba.

**SAXIIXA CADEEYN BIXIYAHA 1-AAD**

MOHAMED MOALLIM ABUKAR MOHAMED




**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- ABDULLAHI ABDIRIZAK JAMA



**SAXIIXA CADEEYN BIXIYAHA 2-AAD**

IBRAHIM ABDI IBRAHIM



2- MOHAMED ALI ABDI



**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

**REP. 1543/T.P.N/25, Tr. 29/04/2025**, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- MOHAMED MOALLIM ABUKAR MOHAMED, 2- IBRAHIM ABDI IBRAHIM** Ahna (Wakaalad Bixiyayaal), **3- ABDULHAKIM LUKMAN HAJI MOHAMED** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Nootaayada, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

**NOOTAAYAHA**

**Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**







XAFIISKA NOTAAYAHA XAMAR  
PUBLIC NOTARY OFFICE

08/05/2017

ORIGINAL

MOGADISHU-SOMALIA

JAMHUURIYADDA F.SOOMAALIYA  
NOTAAYAHA XAMAR

Public Notary Office Mogadishu-Somalia.

XAFIISKA NOTAAYAHA XAMAR  
PUBLIC NOTARY OFFICE

08/05/2017

ORIGINAL

MOGADISHU-SOMALIA



***XEER-HOOSAADKA***  
***SHIRKADDA ASAL PHARMA***  
**ASAL PHARMA**



L/Line: (+2521)658042

Hand Set: +25261 5547775 / +25261 5589802, Somalia

+254716 666164 / +254726 348147, Kenya

Email: [asalpharma200@gmail.com](mailto:asalpharma200@gmail.com)

Xafiisku waxa uu ku yaaalaa Suuqa Bakaaraha Tel:0615514495/0618944707 Email:- [DiirsheNotary@gmail.com](mailto:DiirsheNotary@gmail.com)





## Xeerka Shirkada ASAL PHARMA (Memorundun of association and articles)

### • Hordhac

- Shirkadda Asal Pharma.

Waxaa lagu asaasey magaalada Muqdisho sanadkii 2007.

- Xarunta shirkaddu waa Muqdisho waxa ayna laamo ka furan kartaa gobolada dalka.
- Magaca shirkaddu waa mulki iyada u gaar ah, cid aan iyada ahayni ma qaadan karto mana isticmaali karto.

### • **Magaca, astaanta, halku dhigga iyo cinwaanka shirkadda:**

- Magaca shirkadu waa ((ASAL PHARMA)).

- Hal ku dhiga shirkadu waa: “Quality Products for Quality Life”

Cinwaanka xarunta shirkadu waa:- Muqdisho L/Line: (+2521)658042

Hand Set: +25261 5547775 / +25261 5589802, Somalia

+254716 666164 / +254726 348147, Kenya

- Email: asalpharma200@gmail.com.

### • **Maaliyadda, Mulkiilayaasha shirkada iyo saamiyadooda**

- Maaliyad Shirkaddu waa \$160.000.00 {Boqol iyo Lixdan Kun oo Doolar}.
- Mulkiilayaasha shirkada ASAL Pharma waa kuwa hoos ku qoran:

No.	Name of share-holder	Nationality	Shareholding
1	<b>Maxamed Macalin Abuukar</b>	Somali P/port No. P00315571	\$130,000.00
2	<b>Ibraahim Cabdi Ibraahim</b>	Kenyan P/port No. A1594324	\$15,000.00
3.	<b>Maxamed Abuukar Maxamed</b>	Somali P/port No. P00239491	\$15,000.00

Waa socotaa.....



## Bogga 2/aad

- **Hadafka shirkada**

- Hadafka shirkadu waa:
  - in ay faa'iido maaliyadeed u dhaliso cid walba oo maalgashata
  - in sumcad sare ay bulshada dhexdeeda ku yeelato
  - in ay shaqo u abuurto mujtamaca ay ka dhex shaqeeyso
  - in adeegeeda laga faa'iideysto

- **Ujeedada Shirkadda**

Waa Import and Export {dhoofin iyo soo Dajin} (ASAL PHARMA)

- **Saamileyda**

- Saamileyda waa dadka iska leh shirkada.
- Xubnaha Saamileyda Asal Pharma ma jiraan wax sir ah dhamaan howlaha ay qabato shirkadu
- Hadii uu dhinto xubin ka mid ah xubnaha Saamileyda, waxaa qaybtiisa hantiyeed iska leh dhaxaltooyadiisa waase in ay la yimaadaan warqadda dhaxalka oo sharci ah, sidoo kale waxaa dadka dhaxalkiisa leh loo ogolyahay in ay keensadaan wakiil, wakiilkaas oo ay qabanayaan dhamaan xeerarka u dagan shirkada, isla markaasna waa in lagu ansixiyo cod masiiri ah.
- Saamile shirkadu u baahantahay waayo aragnimadiisa iyo aqoontiisa waxa lala galayaa heshiis shaqo.
- Xubinta saamile ee loo doorto masuuliyad oo ka cudurdaarta masuuliyadaas waxa lagu celinayaa doorasho iyada oo aan xubintii cudurdaaratay aan la dooranayn.



- **Awoodda Saamilayda**

- Golaha Saamileydu waa awooda ugu sareysa ee shirkada.
- Waxa ay leeyihiin awooda magacaabidda iyo fulinta shirkada.
- Waxa ay ansixinteeda leeyihiin in la kordhiyo ama la dhimo hantida shirkada marka ay helaan talo-bixinta golaha fulinta.
- Waxa ay wax ka bedeli karaan xeerka shirkada.

- **Gudoomiyaha Saamileyda**

- waa gudoomiyaha hantiilayaasha.
- Waa gudoomiyaha kalafadhiyada Saamileyda mudada xilkiisa.
- Waxa lagu doranayaa kalfadhiga Saamileyda cod masiiri ah oo aan qarsooneyn.
- Waqtiga Xilkiisu waxa uu ku egyahay muddada ay isla gartaan saamileyda shirkadda in la badalo.
- Shardi ma aha in uu joogo xarunta shirkadda.

Waa socotaa.....



Bogga 4/aad

• **Gudiga Golaha Saamileyda**

- Gudiga Saamileyda waxa uu ka koobanyahay Labo xubnood oo kala ah:-

- Gudoomiye
- Ku xigeen
- Xubin

• **Awoodda Guddoomiyaha Saamileyda.**

- Waxa uu leeyahay awoodda in ay ansixiyaan mashaariicda shirkadu ay galeyso, waxaase shardi ah in la soo hordhigo daraasaad cilmiyeysan oo ay diyaariyeen dad aqoon u leh shaqadaas iyaga oo wargalinaya guddoomiyaha Saamileyda.
- Waxa uu leeyahay awooda ansixinta cidda lagu qorayo hantida iyo sharciyada cusub ee ay yeelato shirkadu.
- Waxaa uu isku xirayaa Saamileyda iyo Fulinta.
- Waxa uu magacaabi karaa Hanti-dhawr (Audit) madax banaan.
- Warbixinta Hanti-dhawrka (Audit) waxa uu u gudbinayaa dhamaan hantiilayaasha shirkada.
- Waxaa uu iskugu yeeri karaa Saamileyda shir aan caadi ahayn isaga oo wargalinaya hantiilayaasha.
- Waxa uu talooyin, tilmaamo iyo tusaalayn siinayaa guddiga fullinta hab qoraal ah.
- Guddiga golaha hantiilayaasha ma faragalin karo shaqada Golaha Fulinta.

Waa socotaa.....



## Bogga 5/aad

- **Kal fadhiyada Golaha Saamileyda**

- Golaha Saamileyda fadhigooda caadiga ah waa 6 bilood mar.
- Goobta kalfadhiyada golaha Saamileyda waa xarunta dhexe ee shirkada.
- Gudiga golaha Saamileyda ayaa u xilsaaran qabanqaabinta, hubinta iyo la socodka guntamista kalfadhiyada shirkada.
- Hadii ay tirade Saamileyda jooga kalfadhigu ka yaraato 2/qof, Saamilaha maqan waxa loo furayaa in ay cod maqnaansho oo qoran (Proxy Vote) ku dhiibtaan fikirkooda waxaase shardi ah tirade kalfadiga joogtaa in ay noqoto ugu yaraan 2qof tirade guud ee Saamilaasha.
- Kalfadhi aan caadi ahanyd waxaa dalban kara 2-qof tirade guud ee Saamilaasha iyaga oo u gudbinaya guddoomiyaha si qoraal ah.
- Hantiile cidina ma mateli karto.

- **Golaha Fulinta**

- Xubnaha golaha fulinta ee shirkadu waa in ay leeyihiin aqoon, khibrad, ammaano, dhaqan wanaagsan iyo karti u qalanta shaqadooda.
- **Awooda iyo shaqada Guddoomiyaha Guud.**
  - Guddoomiyaha waxaa lagu dooranayaa kalfadhiga hantiilayaasha cod masiiri ah oo qarsoodi ah.
  - Guddoomiyaha waxaa laga dooran karaa gudaha iyo dibada shirkada.

Waa socotaa.....



### Bogga 6/aad

- Guuddoomiyaha ayaa magacaabaya agaasimayaasha waaxyaha shirkada isla markaasna waxa lagu ansixinayaa kalfadhiga Golaha Hantiilayaasha.
  - Guddoomiya waxa uu leyahay awooda bedelista agaasimayaasha waaxyaha isaga oo ka ansixinaya Gudiga Golaha Hantiilayaasha.
  - Waxaa uu leeyahay awooda magacaabista ku simaha isla markaasna waxa uu ka dhex dooranayaa agaasimayaasha waaxyaha.
  - Waxaa uu u madax banaan yahay dhamaan hawlaha shirkada.
  - Waxa uu masuul ka yahay guud ahaan maamulka iyo shaqada shirkada.
  - Guddoomiyaha xaq uma laha in uu qaato go'aan masiiri ah.
  - Waxa uu warbixin qoraal ah oo xaaladda shirkada u soo gudbinayaan golaha hantiilayaasha sodonkii cishaba hal mar.
  - Waa in uu miisaaniyada waxqabadka iyo qorshaha shirkada sanadkiiba hal mar soo diyaarsho una soo gudbiyo guddiga golaha hantiilayaasha.
- **Xeerkan**

- Xeerkan sharciga islaamka ayaa asal u ah.
- Xeerkan waa midka lagu kala baxayo wax kasta oo la isku afgaran waayo.
- Wixii aan xeerkaan ku jirin waxaa ka xeer ah sharciga islaamka.
- Qodobkasta oo xeerkaan ku jira oo qilaafsan sharciga islaamka waa la turayaa waxaana lagu bedeleyaa midka islaamka.
- Xubin kasta waxa ay xeerkan saxiixaysaa isaga oo awoodiisa iyo maankiisa iyo xoriyadiisu ay u dhamaystiran yihiin isla markaasna heshiis ugu dhaaraneysa in ay si daacadnimo, walaaltinimo, eex la'aan iyo hagar la'aan ula shirkoobayaan xubnaha kale una fulinayaan xeerkan.

Waa socotaa.....


### Bogga 7aad



Saxiixa Saamileyga Shirkadda

1. Ibraahim Cabdi Ibraahim {Guddoomiye} *Ibraahim Cabdi Ibraahim*
2. Maxamed Abuukar Maxamed {G. ku xigeen} *Maxamed Abuukar Maxamed*
3. Maxamed Macalin Abuukar (Xubin) *Maxamed Macalin Abuukar*

Qaab dhismeedka shirkadda



Jamhuuriyadda F. Soomaaliya  
Xafiiska Nootaayaha Xamar.

REP. NO. 550049/2017

Muqdisho:08/05/2017.

Saxiixa la sugay

Anigoo ah Dr' Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamuud, oo Nootaayo Xamar ah, waxaan Caddeynayaa in Saamileyda shirkadda Asal Pharma, ay yihiin xubnaha ka kooban 3-qof, oo kala ah 1 Maxamed Abuukar Maxamed, iyo Ibraahim Cabdi Ibraahim oo soomaali ah, dhankooda kasoow wakiil kasii ah mudane Maxamed Macalin Abuukar, sida ku cad wakaaladda lam. yahay 53556/2017 ee tr. tahay 05/05/2017, kana soo baxday xafiiskaan Laanta Nairobi, waana xeer hoosaad ansax ah oo waafaqsan shareecada Islaamka.

NOTAAYAHA  
Dr' Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamuud






**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 07/05/2025**

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Ibraahin Cabdi Ibraahim** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **ABDULHAKIM LUKMAN HAJI MOHAMED** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 1543/T.P.N/25, Tr. 29/04/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca Loo Caddeeyaha</b>	ABDULHAKIM LUKMAN HAJI MOHAMED
<b>Taariikhda Caddeynta</b>	29/04/2025

**Wakiilka Loo Caddeeye:** Aniga oo ah **Ibraahin Cabdi Ibraahim**, Leh Tel No. **0615547775**, & 254716666164 Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **ABDULHAKIM LUKMAN HAJI MOHAMED**.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed Cabdi Cali**

---

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Ibraahin Cabdi Ibraahim**

---